



## Tabarucida Xeerka Anshaxa

501 North Dixon Street  
Portland, Oregon 97227  
(503) 916-2000  
www.pps.net

Si aad ugu tabarucdid Dugsiyada Dadweynaha Portland, codsadaayaasha waxaa looga baahan yahay in maraan baarintaanka taariih dembiyeedka isla maraana oggolaadaan Tabarucida Xeerka Anshaxa ee soo socda:

1. Waxaan saxiixi doonaa marka aan joogo xafiiska guud ee dugsiya isla marka aan imaado.
2. Waxaan xiran doonaa ama tusi doonaa aqoonsi mutadawacnimo markasta oo aan ku tabarucayo dugsiya.
3. Waxaan raaci doonaa tilmaamaha maamulayaasha dhismaha, macallimiinta, iyo/ama xubnaha shaqaalaha ee ku habboon.
4. Waxaan oggolahay in aan naftayda markasta u shaqeeyo hab xirfad leh, ixtiraam leh. Waan fahamsanahay in tabarucayaashu ay ardayda u yihiin tusaalayaal waxaan aniguna waxa u qaban doonaa si taasi waafaqsan.
5. Waan fahamsanahay in aan mas'uul ka ahay in aan raaco siyaasadaha iyo nidaamyada soo socda ee Dugsiyada Dadweynaha Portland. Waan fahamsanahay in PPS ay aad uga go'an tahay kala duwanaanshaha iyo ka mid noqoshada dhammaan ardaydu. Waxaan dhowri doona siyaasadaha iyo qiimaha inta aan ku jiro tabarucida. Aragtidayda shakhsi ahaaneed ama siyaasadeed lama wadaagi doono ardayda inta aan ku jiro tabarucida. Haddii aan wax su' aalo ah ka qabo arrintan, waxaan weydiin doonaa macallinka ama maamulaha.
6. Waxaan macallimiinta iyo/ama maamuleyayaasha dugsiya la wadaagi doonaa wixii walwal ah jira ee aan la xiriirin karo daryeelka iyo/ama badbaadada ardayga.
7. Waxaan kaliya isticmaali doonaa xarumaha musqusha dadka waaweyn.
8. Ma aan haysan doono nooc kasta oo hub ah inta aan joogo hanti dugsiya leeyahay ama inta lagu jiro dhacdooyinka dugsiya ee ka baxsan dhismayaasha dugsiya.
9. Ma aan haysan doono ama ma isticmaali doono tubaako ama waxyaabaha la xiriira nikotiinka isla markaana ma aan haysan doono aakolo, marijuana, ama mukhaadaraadka sharci darrada ah kuma isticmaali doono marka aan joogo hanti dugsiya leeyahay ama inta lagu jiro dhacdooyinka dugsiya ee ka baxsan dhismayaasha dugsiya.
10. Waan fahamsanahay in inta lagu gudo jiro tabarucida, in laga yaabo in aan ogaato macmuulaad xasaasi ah oo ku saabsan ardayda, qoysaska, ama shaqaalaha. Waxaan oggolahay inaan ilaaliyo sirta marka la joogo meel ka baxsan dugsiya. Macluumaadka aan ka bartay ardayda ama shaqaalaha lama wadaagi doono qofna marka laga reebo gudashada waajibadkayga tabarucida iyo sida lagu tilmaamay xeerkan anshaxa.
11. Waxaan oggolahay in aan ka fogaado ka faa'iideysiga ama saameynta aan loo baahneyn ee lagu yeelanayo ardayga ee la sameynayo ficil sharci iyo anshax darro ah ama hab-dhaqan kasta oo kale oo ka dhigaya in ardayda lagu anshax mariyo dhaqan xumo, haddii ardayga ama ardaygu dhab ahaantii ku lug yeesho ama aanu ku lug yeelan hab-dhaqanka.
12. Waxaan oggolahay in aanan dhibaato galmo u geysan ardayda, ama tabarucayaasha kale, ama dhaqaalaha dugsiya. Waxaan ka fogaan doonaa xiriir aan habooneyn ee aan la yeelanayo arday kasta, ha ahaato ama yaanay ahaan marka la aan joogo hanti dugsiya leeyahay, oo ay ku jiraan dhammaan noocyada taabashada galmada, xiriirada galmada, ama xiriirka jacaylka, wax kasta oo taabashada la xiriirta oo aan u baahneyn ardaygu ama aan ku haboonayn marka laga hadlayo da'da, jinsiga iyo qaangaarnimada ardayga. Waan ka fogaan doonaa taabashada ama hab siinta 'hugging' ardayda, xataa haddii ardaygu bilaabo taabashada/xiriirka jireed.
13. Waxaan oggolahay in aan si dhakhso ah ugu wargeliyo Waaxda Adeegyada Ammaanka haddii la igu xiro dembi weyn oo aan galay ama aan sameeyo dhaqan xumi dhanka galmada ah, mukhaadaraad, weerar, dembiyo la xiriira hubka.

Heshiiska: Waxaan oggolahay in aan raaco xeerkan anshaxa, heerarka guud ee u yaala hab dhaqanka qofka xirfadlaha ah, iyo ilaalinta sirta. Waan fahamsanahay in tabarucnimadu ay tahay faa' iido, balse aysan ahayn xuquuq. Waan fahamsanahay in ku guuldareysiga in aan u hoggaansamo ay keeni doonto in si degdeg ah la iskaga joojiyo ama si joogta ah la iskala noqdo faa' iidooyinka mutadawacnimada.